

## Waxa laga eego markii aad booqato adeegga

- Malaguu muujiyey soo-dhaweyn? Barnaamijyada kindhaha oo tayada sare waxay ku salaysan yihiin is-kaashi ka dhaxeeya qoysaska iyo bareyaasha. Bar-eyaashu su'aalo makaa weydiyeen ilmahaaga iyo qoyskaaga? Bareyaashu ma daneynayeen su'aalahaaga iyo dareenadaada?
- Haddii ilmahaagu kula socdey, bareyaashu si toos ah ma ula hadleen ilmahaaga (halkii ay kala hadli lahaayeen ilmaha ayagoo adiga kuu marinaya)?
- Ma jireen fursado fan ah iyo waxbarasho taxadi leh ku-waas oo u damaashaada dhaqaanada Carrurta kuwaas oo adeegga isticmaalaya?
- Meelaha cayaaraa gudaha iyo kuwa dibadda ma siiyeen Carrurta waayo-aragnimooyin waxbarasho xiiso leh – tusaale, fursadda in la sahmiyo oo la soo saaro waxyaalo cusub? Ma jireen boosaska carruurtu kula cayaaraan kuwa kale ama keligood? Ma jireen boosaska carruurtu ku xasili lahaayeen?

## Hayso su'aalahaaga oo diyaar ah

- Sidee bareyaashu kuula shaqayn karaan si ay u taa-geeraan waxbarashada ilmahaaga?
- Sidee bareyaashu ugu dari karaan xiisaha ilmahaaga?
- Maxay yihiin fursadaha halkaas ka jiri karta si looga hadlo horumarka ilmahaaga?
- Haddii ilmahaagu qabo baahiyoo dheeraad ah, sidee bay adeeggu u taageeri kartaa adiga iyo ilmahaagaba?
- Sidee buu barnaamiju u dhiirigeliya dhaqanka hab-boon?
- Maxaa dhici doona haddii ilmahaagu xanuusado ama caroodo?

- Adeeggu ma leeyahay shahaadada kindhaha oo muuqata? Shahaadadas waxay muujinaysaa in bar-naamijka kindhahu uu ka helo maalgelin Dowladda Victoria uuna wax baro baraha carruurnimada hore oo tababar.
- Waa maxay qiyaasta adeegga marka loo eego Heerka Tayada Qaraneed (kaas oo qayb ka ah nadaamka tayada oo Australia oo dhan ah ee waxbarashada iyo adeegyada daryeelka)? Ma arki kartaa qiimaynta qoraalka ah?
- Ma jiraa liiska sugitaanka ee boosaska? Ma u baahan tahay inaad carbuun bixiso si aad ugu qorto ama laguugu daro liiska sugitaanka? U-sheeg adeegga haddii aadan awoodin inaad bixiso carbuunta?

## Immisa ayey tahay inuu ilmahu jiro marka uu bilaabayo kindhaha.

Waa u caadi carruurtu inay dhigtaan barnaamijka kindhaha sannadka ka horreya bilowga dugsiga hoose. Badanaa taas waxaa loogu yeeraa ‘kindhaha afar-sano-jirka’.

Ilmahaagu wuxuu bilaabi karaa dugsiga hadduu gaaro shan sano jir 30ka Abril sannadka ay bilaabayaan dug-siga. Ilmahaaga waa inuu ku qoran yahay dugsiga da’daa lix jirka, inay ka-cafin haystaan mooyee. Sidaas darteed, haddii dhalashada ilmahaaga ku aado ka hor 30ka Abril ee sannadka taariikhda, waxaad haysataa ikhiyaarka inaad ku qorto ilmahaaga dugsiga sannadka ay gaareen shan ama sannadka ku xiga. Carrurta heerar kala duwan bay wax ku bartaan, siyaabo kala duwan, iyo waqtio kala duwan. Xaaladaha qaarkood, ilmahaagu wuu ka faai’di karaa bilaabidda barnaamijka kindhaha mar dambe.

## Halkee baan ka heli karaa talooyin ku saabsan waqtiga ku habboon in la bilaabo kindhaha?

Haddii aadan hubin wax ku saabsan waqtiga ugu fiican ee ilmahaagu inuu bilaabo barnaamijka kindhaha, weydii baraha kindhaha wixii talooyin ah. Ogow sida uu bar-naamijka kindhahu u taageeri karo ilmahaaga.

La-kulan maamulaha ama baraha dugsiga ay tahay in ilmahaagu dhigto. Kala hadal waqtiga ugu habboon ee ilmahaagu Bareebka bilaabi karo. Ogow sida uu bar-naamijka Bareebku u taageeri karo ilmahaaga

Sidoo kale, waxaad la hadli kartaa ilmahaaga kalkaali-yahiisa Caafimaadka Hooyada iyo Ilmaha, dhaqtarka qoyska iyo xirfad-yaqaanada kale ee ilmahaagu arko (tusaale ahaan, teerabiga hadalka, fiisiyo-teerabiga ama dhaqtarka Carrurta).

## Ilmahaygu ma dhigan karaa kindhaha wax hal sano ka badan?

Carrurta kuwaas oo ah:

- Aboorjiin ama Torres Strait Islander
- laga yaqaano Ilaalinta Ilmaha, ama ay Ilaalinta Ilmahu usoo-dirtay Child FIRST.

Wuxuu aadi karaa kindhaha oo lacag la’aan ah ama qa-rash hooseeya ah labada sano ka hor intaysan bilaabin dugsiga hoose, badanaa waxay bilaabaan markay saddex sano jir yihiin.

Waxaa diyaariyey:  
Department of Education and Training  
2, Treasury Place, East Melbourne  
Melbourne 3002  
© State of Victoria August 2015

Ka eeg bogga 4aad wixii macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan kindhaha lacag la’anta ah oo loogu talagalay saddex-sano-jirrada.

Carruurta qaardeed oo ay hayso daahidda koritaanka kuwas oo dhammaystay kindhaha afar-sano-jirka way ka faai’di karaan dhammaystirka sannadka labaad oo kindhaha la maalgeliyey ka hor intaysan aadin dugsiga.

La hadal baraha kindhaha haddii aad jeceshahay inaad wax badan ka ogaato ikhtiyaaradan.

## Turjumaan ma u baahan tahay?

Dowladda Victoria waxay siisaa adeegga turjumaanka oo lacag la’aan ah qoysaka ay carruurtu u dhigato bar-naamijyada kindhaha. Weydii baraha kindhaha ee il-mahaaga ama maamulaha adeegga si loo waco adeegga turjumaanka oo lacag la’anta ah.

## Xiriirada la xiriira

Kindhaha Lacag la’anta ah ama qarashka hooseeya – [www.education.vic.gov.au/childhood/parents/kindergarten/Pages/fees.aspx](http://www.education.vic.gov.au/childhood/parents/kindergarten/Pages/fees.aspx)

Kindhaha Lacag la’anta ah ee saddex-sano-jirrada – <http://www.education.vic.gov.au/childhood/parents/kindergarten/Pages/earlystart.aspx>

Sannadka labaad ee Kindhaha loogu talagalay carruurtu koritaankoodu daahay – <http://www.education.vic.gov.au/childhood/parents/kindergarten/Pages/secondyear.aspx>

# Oo dhammaan ku saabsan kindhaha

Somali Translation



Carruurtu waxay tagaan barnaamijka kindhaha sannadka ka horreeya bilaabidda dugsiga, gaar ahaan markay jiraan afar sano. Adeegyada qaarkood waxay kaloo siiyaan barnaamiyada kindhaha oo loogu talagalay saddex-sano-jirrada.

Ka eeg bogga 6aad wiii talooyin ah oo ku saabsan doorashada waqtiga ugu haboon ee ilmahaagu bilaabayo kindhaha.

## Waa maxay kindhahu?

Kindhahu (waxaa kaloo loo yaqaan malcamadda) waa barnaamij loogu talagalay carruurta yaryar oo uu bixiyo baraha carruurnimada hore.

## Maxuu ilmahaaygu u tagayaa kindhaha?

Kindhaha waa tallaabo muhiim u ah carruurta yaryar waxaa si adag loogu taliyaa carruurta oo dhan.

Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in kindhahu uu ha-gaajiyo caafimaadka iyo ladnaanta carruurta, ka caawiyo inay samaystaan xirfadaha bulshadeed wuxuuna dhiri-geliyaa jacaylka waxbarashada.

Carruurta dhigta barnaamijka kindhaha waa kuwa madax-bannaan oo isku kalsoon waxay u dhowdahay inuu sameeyo u-gudbid hallaasi ee dugsiga hoose (Bareebka).



## Halkee baan ka heli karaa kindhaha?

Kindhayaasha qaarkood waa adeegyo keligood iswada (tusaale ahaan, kindhooyinka bulshada) barnaamijyada kale ee kindhaha waxaa wada xaruumaha daryeelka maalinta oo dhan ama dugsiyada.

Si aad uga hesho barnaamijka kindhaha ee degaankaaga (goobta aad doonayso) ka eeg [www.education.vic.gov.au/findaservice/Home.aspx](http://www.education.vic.gov.au/findaservice/Home.aspx) ama la xiriir degmada degaankaaga, taas oo aad ka heli karto [www.dtpli.vic.gov.au](http://www.dtpli.vic.gov.au)

Ka eeg bogga 4aad wixii talooyinah oo ku saabsan barnaamijka kindhaha kaas oo ku habboon qoyskaaga.

## Carruurta oo dhan way dhigan karaan kindhaha


Kindhaha waxaa loogu talagalay carruurta oo dhan. Haddii ilmahaagu uu qabo iin ama dhibaato waxbarasho, bareyaasha ayaa kaala hadlaya wixii ku saabsan siday barnaamijka iyo beya'ddu u taageeri karaan ilmahaaga.

Haddii aad u baahan tahay taageero si aad ilmahaaga ugu qorto barnaamijka kindhaha ama inaad hesho barnaamij ku habboon qoyskaaga la xiriir degmada degaankaaga.

## Immisa ayaa kindhahu qarash ahaan ku kacayaa?

Dowladda Victoria waxay lacag siisaa adeegyada si ay ugu tabarucdo qarashka socodsiinta barnaamijka kindhaha oo la malgeliyo, kaas oo ka caawiya in uj-rooyinka loogu talagalay kindhaha afar-sano-jirrada inuu noqdo mid hooseeya intii suurtagal ahba.

Ka eeg shahaadada, taas oo muujinaysaa in barnaamijka kindhaha uu ka helo maalgelin Dowladda Victoria uuna bixiyo baraha carruurnimada hore oo tababar.



Ilmahaagu xaq buu u leeyahay haddii ay:

- yihiin aboorjiin ama Torres Strait Islander
- yihiin mataanaha saddexlaha ama afarlaaha ah
- haystaan (ama uu waalidkoodu ama ilaaliyahoodu haysto) kaaraka kadhafidda ay u xaq leeyihii ama qaxooti yihiin, baniadannimo ama haystaan fisida ma-gan-gelyo doonka.

Weydi baraha kindhaha ee ilmahaaga ama maamulaha adeegga haddii aad u malaynayo in ilmahaagu uu u xaq u leeyahay kabidda ujradda.

## Kindhaha lacag la'aanta ah ee loogu talagalay sad-dex-sano-jirrada

Dowladda Victoria waxay kabtaa ujrooyinka carruurta qaarkood si ay u dhigtaan kindhaha laba sano oo lacag la'aan ah ka hor intaysan bilaabin dugsiga hoose, bada-naa marka ay saddex sano jir yihiin.

Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu dhigto kindhaha lacag la'aanta ah haddii ay jiraan ugu yaraan saddex sano 30ka Abril iyo inay:

- yihiin aboorjiin ama Torres Strait Islander
- laga yaqaano Ilaalinta Ilmaha, ama ay Ilaalinta Ilmahu usoo-dirtay Child FIRST.

Haddii uu ilmahaagu helay barnaamijka lacag la'aanta ah ee labada sano ee ka horreeya dugsiga, waxay dhigan karaan barnaamijka afar-sano-jirada sannadka labaad kaas oo lacag la'aan ah ama qarashkiisu hooseeyo.

Weydi baraha kindhaha ee ilmahaaga ama maamulaha adeegga wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada kindhaha ee ilmaha saddex-sano-jirrada ah.

## Doorashada barnaamijka kindhaha

Qoys kastaa waa ka duwan yahay kuwa kale. Taas macnaheedu waa in barnaamijka kindhaha aad dooratay noqdo mid ku habboon ilmahaaga iyo qoyskaaga.

Waa fikrad fican in hore loo raadsado barnaamijka kindhaha, maaddaama nadaamka ku-qoriddu uu u kala duwan yahay Victoria. Adeegyada qaarkood waxay aqbalaan codsiyada markii carruurtu gaarto laba sano.

Markii aad ku soo baxdo liiska dhow ee barnaamijyada kindhaha, la xiriir adeegyada si aad u ogaato haddii ay qabanayaan maalinta macluumaad-siinta ama kulannada macluumaad-siinta, ama ballan la samayso si aad ugu tagto.

Tani waa sida ugu fican si aad 'dareen' uga hesho bar-naamij kasta, si aad su'aalo u weydiiso iyo si aad ula wadaagto macluumaadka ku saabsan ilmaha. Waa xad kaloo ogaan kartaa wax ku saabsan maalmaha iyo waq-tiyada uu socdo barnaamijka kindhaha, sida loogu qoro ilmahaaga iyo wixii ujrooyin ah oo laga qaado iyo wixii kabit ah oo la heli karo.

Booqo wax ka badan hal barnaamij haddii aad awoodo. Isku day inaadan isku hallayn oo keliya waxay qoysaska kale kuu sheegeen.